

Gaadiidka ku gaynayo Xarumaha Talaalka COVID-19

Maarso 2021



Waxaa hadda jira dookhyada gaadiid qaadaaya dadka reer Maine ee u baahan inay tagaan ayna ka yimaadaan balanta talaalka COVID-19. Gaadiid bilaash ayay heli karaan dadka aan heli karin gaadiid la isku halayn karo, aan awoodin inay gaarigooda wataan, ama haddii kale aan awoodin inay u socdaalaan balantooda.

Dookhyada Gaadiidka

Gaadiidka Xaalada aan Degdega ahayn ee MaineCare

Haddii aad xubin ka tahay MaineCare aadna horay u adeegsan jirtay Dalaalka Gaadiidka Xaalada aan Degdega ahayn oo kuu diyaarsha adeegyada ay daboosho MaineCare, waa inaad wacdaa [dalaalkaas](#) si aad u hesho gaadiid ku geeya balantaada. Waa qasab inaad qabsataa balanta talaalka kahor intaadan gaari codsan, waana qasab inaad codsataa in gaari lagugu qaado ugu yaraan 48 saacadood kahor xiliga balantaada la mudeeyay.

Gaadiidka Talaalka ee ModivCare

Dookhaan ayaa u furan dadka dagan Maine oo aan heli karin gaadiid la isku halayn karo, ayna ku jiraan xubnaha MaineCare ee aan u qalmin Gaadiidka Xaalada aan Degdega ahayn.

Gaadiidka ayaa lagu heli karaa balamaha talaalka ee u dhexeeya saacadaha 7:00 subaxnimo iyo 4:00 galabnimo Isniinta ilaa Sabtida. Waa inaad qabsato ballantaada talaalka kahor inta aadan codsanin gaadiid raac. Si aad u qorsheysato gaadiid raac, ka wac Modivcare lambarka **1-855-608-5172** ugu yaraan 48 saacadood kahor ballantaada.

Fadlan ogsoonow gaadiid looma bixin karo inaad goobaha talaalka adiga oo aan dagin tallaalka ka qaadato.

U diyaar Garoobida Socdaalkaaga

Haddii aad isticmaali doonto midkood labada nooc ee gaadiid raaca, fadlan xusuusnoow waxyaabahan soo socda:

- Marki aad taleefon dirto si aad u qabsato gaadiid raac, waxaad u baahan doontaa inaad sheegto taariikhda iyo waqtiga ballantaada iyo magaca, cinwaanka guri, iyo taleefon lambarka xarunta aad ka qaadan rabto tallaalka.
- Gaadiid raac ayaa lagu siin doonaa aad ku tagto kagana soo laabato ballantaada.
- Kuwani waxay ahaan karaan gaadiid raac la wadaago si ay DHHS u siiso gaadiid qof kasta oo u baahan.
- Afsaab ayaa la iskaga baahan doonaa.
- Waa inaad diyaar u sii ahaato in lagu qaado ballantaada 30 daqiiqo kahor ilaa iyo 15 daqiiqo kadib xilliga lagu qorsheeyay in lagu qaado.
- Darawalkaaga ayaa ku geyn doona, waxaana lagu soo qaadi doonaa qiyaas ahaan 60 daqiiqadood kadib bilowga waqtiga ballantaada.
- Waxaa lagu soo wici doona maalin kahor ballantaada si lagu xasuusiyo gaadiidka aad qabsatay.

Si aad wax badan uga barato qabsashada ballantada tallaalka, booqo www.maine.gov/covid19/vaccines/vaccination-sites ama ka wac Khadka Taleefonka Tallaalka Bulshada Ee Covid-19 Ee Maine lambarka 1-888-445-4111. (si aad u hesho adeegyada turjumaada, ku dhawaaq luuqadaada marka taleefonka la qabto. Dadka dhagaha la' ama maqalka ku adag yahay waxay wici karaan 711 waxayna ka codsan karaan in lagu xiriiriyo 1-888-445-4111.)

Si aad dukumiintigaan ugu codsato qaabab kale, wac (207) 287-5014. Haddii aad kamid tahay macaamiisha dhagaha la' ama maqalka ku adag yahay, fadlan wac 711 (Maine Relay) ama imayl u dir ADA-Civilrights.dhhs@maine.gov